



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.10-aad**

18/11/2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa 10-aad Saac.fur.11:00gd.Saac.Xir.1:23 gd.

Guntinta(Quorum) 140-Xildh.

Ajendaha:-

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
- 2. Ansaxinta Ajendaha**
- 3. Akhrinta 3-aad Hindise sharciyeedka Maalgashiga Shisheeye**
- 4. Qaybinta Mashruuc Sharci ku saabsan Xuquuqda Liilitirka iyo Deeqaha ay ku yeelanayaan Siyaasiyiinta Dowladaha Federaalka .**

1.Shir-guddoomiye, Guddoomiye k/x.Baarlamaanka JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad,

Waxaa shirka Furey Guddoomiye k/x.2-aad Baarlamaanka JFS.Mudane,Mahad Cabdalla Cawad waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka Kariimka,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

2.Kadib, Guddoomiye k/x-2aad wuxuu soo jeediyey in Ajendaha maanta uu yahay Akhrinta 3-aad Hindise Sharciyeedka Maal-gashiga Shisheeye.iyo Qaybinta Mashruuc ku saabsan Xuquuqda liilitirka iyo Deeqaha ay ku yeelanayaan siyaasiyiinta Dowladda Federaalka ,wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Ajendaha ,Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

3.Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Ganacsigaiyo Warshadaha Xildh.Gaarane,wuxuu warbixin kooban ka bixiyey Sharciga Maalgashiga Shisheeye,wuxuuna sheegay in sharcigaan muddo badan uu soo jiidamaayey ilaa 2013-ka ,wuxuuna marayaa akhrintiisa 3-aad .markasto wuxuu sheegay in la weydiyo in aan sharci leenahay iyo inkale ,haddaan sharci lahayn cid kuu imaanaysa oo heshiis kuula geleysa ma jirto Miftaaxana waa sharcigaan,faa'idooyinka laga helaaya way badanyihiin sida shaqaale Soomaaliyeed oo farabadan ayaa shaqo ka heleysa,waxaa laga helayaa lacago Canshuur ah ,iyo ownership(lahaansho).wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Hindise sharciyeedka.

4.Guddoomiyaha wuxuuna u yeeray Xoghayaha Guddiga Xildh. C/laahi Coonka si uu u akhriyo Hindise sharciyeedka Maalgashiga Shisheeye.

Xildh.C/laahi Coonka wuxuu akhriyey Hindise sharciyeedka Maalgashiga Shisheeye, ugu danbeyna wuxuu sheegay Sharcigaan faa'iido weyn uu ugu fadhiyaa Ummadda Soomaaliyeed, marka la ansaxiyo sharcigaan dadbadan ayaa ka heleyaan shaqo,dadbadan oo shaqaale ah oo hadda shaqeynin in ay ka heleyaan Shaqo,aqoon iyo cilmi xagga technologyada Casriga ah. Waxaa furmaya Dugsiyo Farsamo ,hadduu jiro Musuq-maasuq maalgelinna ma imaankaro.

Xildh. C/laahi Jaamac, wuxuu soo jeediyey in Guddoomiyaha Guddiga ganacsiga iyo Warshadaha uu xoojiyo qeybaha (Sectors)-ka horey u jirey in la xoojiyo sharciga Maalgashiga shisheeye,waxaa ka faa'ideysanaaya dhallinyaro fara badan oo hadda shaqo la'aan ah. Wuxuu soo jeediyey in loo baahanyahay in xagga bankiyada la dhiso si ay u shaqeeyaan .wuxuu intaa ku daray in la joojiyo musuq-maasuqa,wuxuuna soo jeediyey in sharcigaan la ansaxiyo.

Xildh.Xasan wasiir k/xigeenka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha,wuxuu sheegay in sharcigaan ay sal(base) ugu dhigeyn sharci lam. 19 ,haddii uu jiro sharci lagu shaqeynaayo waxaa la helayaa maalgashi shisheeye ,waxay dowladda ka heleysaafaa'iido badan sida canshuur iyo shacabka oo shaqo ka hela iwm.

4.Guddoomiyaha wuxuu sheegay Hindise sharciyeedkaan waxa uu ka qabo Xeer-hoosaadka ,in sharci kasto markuu marayo akhrinta 3-aad ,3-maalmood kadib loo codeeyo.Xildhibaanadana wuxuu u sheegay in ay fursad u haystaan Mudada 3-da maalmood in wixii wax ka bedel ah ay ku soo sameeyaan soona gudbiyaan qoraal ahaan iyo siiqada laga dhigaayo ,haddii wax ka bedel imaanin Guddoonka wuxuu soo jeediyey in usbuuca soo socda loo codeyo.

Kalfadhiga 7-aad Kul.10-aad uu shir-guddominaayey Guddoomiye K/Xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad ,wuxuuna sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markuu ahaa 01:23gd